Somali

# NSW Health
# Xaashida gaarnimada ee bukaan-socodka

## Waajibaadkayaga
Waxaan ballanqaadaynaa inaan ula dhaqano macluumaadkaaga shaqsi si waafaqsan sharciga gaarnimada.

Xaashidan yar waxay sharxaysaa sida iyo sababta aan u qaadno macluumaadka shaqsi oo kugu saabsan, sidaad u heli karto maluumaadkaaga iyo sida maluumaadkaaga loogu adeegsan karo adeegga caafimaadka dadweynaha ee NSW ama loogu sheego qaybaha kale.

## Qaadidda Macluumaadkaaga shaqsiyeed
Waxaan macluumaadka si toos ah uga qaadnaa adiga marka kasta oo ay suurtagal tahay. Haddii aysan taasi suurtagalayn, ama wax degdeg ah jiraan, waxaan kaloo u baahan karnaa inaan macluumaadka ka qaadno xubnaha qoyska, saaxiibka, daryeelaha ama qofkii kale oo naga caawin kara inaan ku siino daryeelka caafimaadka ee habboon.

## Ammaanka macluumaadka la qaaday
Macluumaadkaaga waxaa loogu hayn karaa adeegga caafimaadka dadweynaha ee NSW siyaabo kala duwan. Waxaana badanaa, macluumaadkaaga loo hayaa asagoo diiwaan caafimaad ah, iyo/ama diiwaan caafimaad ilagtarooni ah kaas oo qayb ka ah kaydka-macluumaadka kombiyuutaraysan oo uu sugan yahay ammaankiisu. Macluumaadka qaarkiis Waxaa kaloo loo hayn karaa asagoo qaab muuqaal ah sida raajada ama sawirka, ama asagoo ah maqal ama fiidiyow duuban.

Waxaan raacnaa xeerar ad-adag iyo qorsheyaal khuseeya kaydinta sugan ee macluumaadka shaqsi qaabab kastoo uu yahay si looga ilaaliyo macluumaadkaaga inay hesho cid aan idmanayn, lumidda ama gabood fallada kale.

## Adeegsiga ama daah-furka macluumaadka
Macluumaadka caafimaadkaaga shaqsi kaas oo loo hayo qaab warqad ah ama ilagtarooni ah waxaa adeegsan kara adeegga caafimaadka dadweynaha ee NSW, ama waxaa loo daah-furaa meel ka baxsan adeegga caafimaadka, si loo helo daryeel iyo daaweyn habboon in lagu siiyo. Tusaale ahaan, macluumaadkaaga waxaa loo adeegsan karaa ama loo daah-furi karaa sidan soo socota:

- adeegyada caafimaadka daaweynta ee kale, isbitaallada ama takhsusleyaasha caafimaad oo ku howllan daryeelkaaga iyo daaweyntaada
- GP-gaaga aad sheegatay, oo uu ku jiro macluumaadka la socda ka-bixidda isbitaalka iyo dokumantiga meel-u-diridda
- sii laguula soo xiriiro guriga wixii khuseeya ballamaha daba-galka
- daryeelahaaga si loogu caawiyo daryeelkaaga
- Adeega Ambalaaska ee NSW
- si loo baroosees-gareeyo baarisyada baatooliga ah, raajooyinka iwm
- si laguula soo xiriiro wixii ra'yi-celin ah oo ku saabsan adeegyada aad naga heshay si ay nooga caawiso inaan qiimayno ama hagaajino adeegyadeena
- wixii biilal iyo dayn soo-celin ah
- shaqaalaha daryeelka diiniga ah, oo ay ku jiraan jablaynka isbitaalka, oo lagu bixiyo daryeelka ruuxiga ama diiniga ah
- ardayda iyo shaqaalaha kale wixii ujeeddooyin tababar ah
- adeegyada caafimaadka kale iyo qaybta saddexaad oo idman si ay gacan uga gaysato in laga hortago hanjabaadda daran ama muuqata oo laga hayo cid kale nolosheeda, caafimaadkeeda ama daryeelkeeda, sida markii wax degdeg ah jiraan
- maamuleyaasha dacwooyinka iyo shaqsiyaadka ku xiran wixi ujeeddo maarayn cabasho ah, tallaabo sharci ah, ama dacwo laga keenay adeegga caafimaadka ama xirfad-yaqaannada caafimaadka daaweynta
- wixii ujeeddooyin la xiriira shaqada adeegga caafimaadka ee NSW iyo daaweynta bukaan-socodkeena, oo ay ku jiraan maalgelinta, qorshaynta, ammaanka iyo hagaajinta tayada howlaha.

**Haddii aadan doonayn inaan qaadno, adeegsano ama daah-furno macluumaad gaar ah oo adiga kugu saabsan, waxaad u baahan tahay inaad noo sheegto waxaana kaala hadli doonaa wixii cawaaqib ah oo arintaasi ku yeelan karto daryeelka caafimaadkaaga.**

Sharcigu wuxuu kaloo noo ogol yahay ama uga baahan yahay macluumaadka caafimaadkaaga shaqsi in loo daahfuro qaybaha saddexaad, tusaale ahaan:

- haya'daha dowlad-goboleedyada iyo xukuumadda Commonwealth-ga wixii ujeeddooyin warbixin sharciyeed ah, sida in la soo sheego cuduro laysu wargasho, tusaale, kansarka iyo cudurada faafa, in la soo sheego dhalashooyinka iyo dhimashooyinka, iyo in la bixiyo faahfaahinta Medicare-ka
- cilmi-baareyaasha wixii mashaariic cilmi-baaris dan dadweyne ah oo uu ogolaaday Guddiga Human Research Ethics Committee
- adeegyada caafimaadka ee kale ama haya'daha fulinta sharciga, sida booliiska, haddii aad na siiso caafimaad la xiriira dambi daran, oo uu ka mid yahay weerarka, rabshadda qoyska, ku-xadgudubka ilmaha, iwm
- haya'daha kale halkaas oo macluumaadku la xiriiro ammaanka, daryeelka ama ladnaanta ilmaha ama qofka dhalin-yarada ah
- si loo fuliyo sabiinada ama waaranka baarista haddii macluumaadkaaga shaqsi looga baahdo marqaati ahaan maxkamadda.

## Personally controlled eHealth Record (PCEHR)

A personally controlled eHealth Record (PCEHR) waa khulaasad diiwaan online sugan ah oo ku saabsan macluumaadka caafimaadkaaga. Diiwaankaaga eHealth wuxuu u ogolaanayaa adiga iyo dhaqtarkaagaba, isbitaallada iyo bixiyayaasha daryeelka-caafimaadka inay arkaan oo ay wadaagaan macluumaadka caafimaadkaaga. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg: www.ehealth.gov.au

## Helitaanka macluumaadkaaga

Waxaad xaq u leedahay inaad codsato helitaanka dhammaan wixii macluumaad shaqsi ah oo ay ka midka yihiin diiwaanka caafimaadkaaga oo ay hayaan adeegyada caafimaadka ee NSW. Sida caadiga ah waxaa lagu weydiin doonaa inaad ku soo codsato wixii helitaan ah qoraal aadna keento aqoonsi. Waxaa lagaa qaadi karaa ujrad haddii aad codsato koobiyo ku saabsan macluumaadkaaga shaqsi ama diiwaanka caafimaad. Dalabyada wixii helitaan macluumaad ah waa laga soo jawaabayaa sida ugu dhaqsaha badan, ama badanaa xaaladaha inaan ka badnayn 28 beri.

Wixii helitaan ah oo ku saabsan macluumaadkaaga shaqsi waa la diidi karaa duruufaha qaarkood, sida markii siinta helitaanku ay u keenayso adiga ama qof kale khatar dhimireed ama waxyeello jireed.

Haddii aad rumaysan tahay in macluumaadka aan kaa hayno inuu yahay midaan sax ahayn ama khalad lagu sameeyey, fadlan aan ogaano waana sixi doonaa ama waxaan ku daraynaa qoraal diiwaankaaga caafimaad.

Dalabyada helitaanka ee diiwaankaaga caafimaad waxaa lagu soo hagaajinayaa adeegga Macluumaadka Caafimaad ama maamulaha tas-hiilaadka adeegga caafimaadka aad tagto.

## Nala soo xiriir

Haddii aad ka qabto wax su'aalo ama cabasho ah oo ku saabsan gaarnimada macluumaadkaaga shaqsi, fadlan kala soo-xiriir Sarkaalka Xiriirka Gaarnimada wixii khuseeya adeegga caafimaadkaaga. Faahfaahinta xiriirka waxaa laga helaa: www.health.nsw.gov.au/patients/privacy/Pages/privacy-contact.aspx

## Adeegga Fasiraadda iyo Turjumidda

Haddaad uga baahan tahay caawimaad la-xiriiridda adeegyada sare ama aad u baahan tahay turjumid, fadlan waxaad ka wacdaa Adeegga Fasiraadda iyo Turjumidda (TIS) taleefanka 13 14 50.

Wixii ku saabsan ku helidda warqaddan yar ee luqadaha kale ah, iyo macluumaadka caafimaad ee luqadaha-badan, ka eeg: www.mhcs.health.nsw.gov.au